



Toronto
Community
Housing

SU'AALO & JAWAABO LACAGAHA WAXQABADKA KIRAYSTAHA AGOOSTO 2019

Waa Maxay Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha?

Toronto Community Housing waxay sameynayaan Miisaska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah si aay gacan uga geystaan u qeybinta lacagaha Golaha Kiraystaha iyo Isticmaalka Meelaha (oo loo yaqaan Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha). Lacagahan waxaa la siin doonaa kiraystayaasha ama kooxaha kiraystayaasha u baahan dhaqaale aay wax uga qabtaan muhimadahooda beeshooda.

Sheeyada soo socdo waxaa loo diyaariyey in aay dadka ka caawiyaan jawaabaha su'aalaha ku saabsan habraaca qeybinta Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha.

Waa maxay ujeeddada Miisaska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah?

Miisaska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah waxay dib-u-eegi doonaan oo ansixin doonaan codsiyada kiraystayaasha iyo kooxaha kiraystaha sameeyaan oo ka jawaabi doona muhimadaha kiraystaha-tilmaamay.

Habraaca ku-meelgaarka ah wuxuu gacan ka geysan doonaa mabaadi'da hageysa habka cusub ee qeybinta iyo qoondeynta lacagaha beesha la siiyo. Waxyaabaha la ogaado waxaa lagu dari doonaa habraac la bedelay (waayadii dambe loo bedelay Lacagaha Wax-qabadka Kiraystaha) ee la hirgelin doono markii la sameeyo Habka Howlgelinta Kiraystaha ee la-cusbooneysiyeey.

Yaa xaq u leh in uu dalbado Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha?

Kiraystayaasha Toronto Community Housing oo dhan weey codsan karaan dhaqaale loogu talo-galay mashaariic iyo dadaalo ka jawaabaya muhimadaha kiraystaha-tilmaamay.

Xubnaha Miisaska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah looma ogola in aay soo gudbiyaan codsiyo lacageed ee dadaalada beeshooda, laakiin xubnaha beeshooda weey dalban karaan Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha loogu-talo-galay.

Codsadayaasha oo dhan waa in aay soo xiraan lacagta hore loogu qoondeeyey inta aaysan raadsan dhaqaale dheeraad ah. Kirayste walba oo ku takrifala lacagaha xaq uma yeelan doono in uu dhaqaale dalbado mustaqbalka.

Waa maxay habraaca lagu dalbanayo Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha?

Kiraystayaasha waxay soo gudbin karaan foom codsi, oo laga heli karo bogga [Habka Howlgelinta Kiraystaha La-cusbooneysiyeey](#). Markii la gudbiyo, foomka codsiga waxaa dib u eegi doona Miiska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah ee waaxdaada waxayna go'aamin doonaan in lacag loo qoondeeyo iyo in kale.

Sidee ayaan ku ogaan doonaa in aan heli doono lacagta codsiga aan gudbiyey?

Kiraystayaasha waxay heli doonaan warqad xaaladda codsigooda ah labo toddobaad gudahood ka dib taariikhda shirka codsigooda dib-loo-eegayo dhaco. Haddii codsigaaga la ansixiyo, waxaa kula soo xiriiri doona Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha ee degaanka si uu kaagala hadlo talaabooyinka ku-xiga.

Sideen ku heli karaa foomka codsiga Lacagta Waxqabadka Kiraystaha?

- Adigoo booqanaya website-keena torontohousing.ca/TER
- Adigoo u diraya email taf@torontohousing.ca
- Qof ahaan ka qaado Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha (CSC)
- Qof ahaan uga qaado Xafiiskaaga Unugga Howlfulinta

Mashaariicdee ama dadaaladee ayaan ku heli karaa lacagta loogu talagalay ee ka timid Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha?

- Aqoonsiga mutadawaciinta
- Cunto mutadawaciinta iyo ka-qeybgalka loogu talo-galay
- Tababar
- Daabacaad
- Qalab iyo alaab
- Qalab isboorti*
- Qalab saxaafadeed*
- Qalab-guri iyo aaladaha-qurxinta (gudo iyo dibad)*
- Madadaalo iyo majaajilo
- Alaabta farshaxanka*
- Sheeyada kushiinka/aqalada*
- Alaabta iyo aaladaha-qurxinta jardiinooyinka*
- Lacagta Toronto Transit Commission (TTC), ama lacagta safarka celinteeda oo aay la socoto war tafatiran ee geeynta sheeyada/qalabka aagga dhacdada
- Ceymis haddii ceymis shirkadeed uusan ku jirin
- Ruqsadda dhacdada (haddii aay quseyso)
- Dad khudbado/madadaalo dhiirigelin ah jeedinaya

*Sheeyada la soo iibiyo waxaa iska leh Toronto Community Housing waxaana heli kari doona kiraystayaasha si aay wax kale ugu isticmaalaan.

Waa maxay cadadka doolarka ugu badan ee loo qoondeyn karo mashruuc ama dadaal aan soo gudbiyey anigoo maray Lacagta Waxqabadka Kiraystaha?

Ugu badnaan \$1,000 ayaa loo qoondeyn karaa mashruuc ama dadaal.

Ka waran haddii aan kaalmo u baahdo buuxinta foomka codsiga?

Haddii aad u baahatid kaalmo buuxintga foomka codsiga, waxaa la xiriiri kartaa Isku-duwahaaga howlgelinta Adeegyada Beesha (CSC). Haddii aadan garaneyn qofka CSC-gaaga qofkuu yahay, kala xiriir Xarunta

Daryeelka Macaamiisha **416-981- 5500** markaa wakiil ayaa kugu xiri doona qofka saxda ah.

Waa maxay taariikhaha kama-dambeysta ah ee soo-gudbinta?

Codsiyada waa in aaysan ka soo daba-marin 11:59 habeenimo ee maalinta kama-dambeysta ah.

- Dib-u-eegidda **Sitembar**, codsiyada waa in la soo gudbiyo **Sabti, Agoosto 31, 1019.**
- Dib-u-eegidda **Oktoobar**, codsiyada waa in la soo gudbiyo **Isniin, Sitembar 30, 1019.**
- Dib-u-eegidda **Nufeembar**, codsiyada waa in la soo gudbiyo **Khamiis, Oktoobar 31, 1019.**

Sideen ku heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ah Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha?

Wixii war dheeraad ah, waxaad sameyn kartaa:

- La xiriir Isku-duwahaaga howlgelinta ee Adeegyada Beesha (CSC)
- Email u dir EngagementRefresh@torontohousing.ca
- Naga soo wac **416-981-4435**
- Fiiri [xirmada macluumaadka](http://xirmada.macluumaadka.torontohousing.ca/TER) oo laga heli karo website-keena torontohousing.ca/TER.

Fadlan xusuuso: dhamaan su'aalaha waxaa loo gudbin doonaa kooxaha howlgelinta degaanka oo ku siin doona macluumaad dheeri ah.